

Sagor för barn på svenska

berattelser.se

Mir yar: Sheekadii Wangari Mathay

Skriven av: Nicola Rijdsijk

Illustrerad av: Maya Marshak

Översatt av: Anwar Mohamed Dirie

Denna saga kommer från African Storybook (africanstorybook.org) och vidarebefordras av Sagor för barn på svenska (<https://berattelser.se/>), som erbjuder sagor på många språk som talas i Sverige.


Detta verk är licensierat under en Creative Commons






[Erkännande 4.0 Internasjonal Licens.](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.sv)

<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.sv>



Mir yar: Sheekadii Wangari Mathay



 Nicola Rijdsijk
 Maya Marshak
 Anwar Mohamed Dirie
 somaliska
 nivå 3



Tuulo ku taal dhinaca hooseyo buurta
Kenya ee Bariga Afrika, gabar yar ayaa
hooyadeed kala shaqeyn jirtay beeraha.
Magaceedu waxa uu ahaa Wangari.

Wangari bannaanka ayay aad u jeclaan
jirtay. Baangad ayay ku qodqodday carrada
beerta goyskooda. Waxayna dhulka
qandacsan ku aastay miro aad u yaryar.





Watigay ugu jeclayd maalinta waxa uu ahaa marka ay cadceeddu dhacdo. Marka ay mugdi saaid u noqoto aragtida dhirta, Wangari waxay ogaataa in ay tahay xilligii ay guriga aadi lahayd. Waxayna qaadaa waddoyin dhuudhuuban oo dhex maro beeraha, ayadoo gudbeyso webi yaal markay baxdo.


Wangari waxa ay dhimatay 2011, laakiin waa aannu xusuusannaa mar walba oo aan aragno geed qurux badan.



Wangari si adag ayay u shaqaysay. Dadka duniida oo dhan ayaa ogaaday, waxaa na la siiyey abaalmarin caan ah. Waxa la yiraahdaa Abaalmarinta Nabada ee Nobel, waxa ayna noqotay haweeneyda ugu horeysay ee kalligeed Afrika laga siiyey abid.



Wangari waxa ay ahayd ilma fariid ah wayna sugi la eyd in ay iskuul aado. Laakiin hooyadeed iyo aabbaheed waxa ay doonayeen in ay jooqto oo ay guriga ka caawiso. Markii ay toddoba jirsatay, walaalkheed ka weyn ayaa ku qalqaaliyey walaalkheed in ay u oggolaadaan in ay iskuul aaddo.



Way jeclayd in ay wax barato! Wangari waxay wax ka baratay in badan oo badan buug walbey aqrisay. Iskuulka oo ay aad ugu wanaagsanaatey darteed waxaa lagu casuumay in ay wax ku barato dalka Maraykanka. Wangari waa ay faraxday! Waxa ay doonaysay in ay wax badan ka ogaato dunida.



Waxuu waqti gudbo ba, dhirtii cusbeyd waxa ay noqotay kayn, webiyadiina mar kale ayay biyo keeneen. Farriintii Wangari, Afrika ayay ku faaftay. Maanta, malaayiin geedo ah ayaa ka soo baxay mirihii Wangari.

Wangari wax badan oo cusub ayay ku
baratay jaamacada maraykanka. Waxa ay
baratay dhirta iyo sida ay u baxaan. Waxa ay
ayna xususatay sidii ay usoo kortay: la
ciyaarki walaaladeed hooska geedaha
kaymihii qurxoona ee Kenya.



Wangari way garanysay waxa ay tahay in la
sameeyo. Waxa ay bartay hawenkii sida
dhirta miro looga abuurro. Hawenku dhirta
ayay sii iibin jireen lacagta ka soo baxdana
waxay u isticmaali jireen in ay qoysaskooda
ku daryeelaan. Hawenkii waxa ay noqdeen
kuwo faraxsan. Wangari ayaa ka caawisay
in ay dareemaan awooddooda iyo xooq.





Markii ay wax sii barataba, waxa ay sii ogaanaysay in ay dadka Kenya aad u jeceshahay. Waxa ay doonaysay in ay noqdaan kuwo faraxsan oo xor ah. Markii ay wax sii barataba, waxa ay soo xusuusan jirtay gurigeedii Afrika.



Markii ay wax barashadeedii dhammeysatay, waxa ay ku noqotay Kenya. Laakiin wadankeedii waa is beddelay. Beero baaxad leh ayaa is daba jiidnaa dalki. Haweenku ma heysan xaabo ay wax ku karsadaan. Dadku fakhri ayay ahaayeen, carruurtuna waa ay gaajeysnaayeen.